

Xeer Maamuleed 24 Juunyo 1959, lamba. 43 diiw.

Wax/ka/beddel qodobka 1aad, XM. 18 Maajo 1956, lamba. 78 Xeerka Nidaamka Xukuumadda Soomaaliya.

MAAMULAHA

Markuu Tixgeliyey baahida loo qabo in wax-ka-beddel lagu sameeyo qodobka 1aad, ee Xeerka Nidaamka Xukuumadda Soomaaliya oo lagu ansixiyey XM. 18 Maajo 1956, lamba. 78; Asaga oo Cuskanaya awoodda uu siinayo sharciga 7 Maajo 1956, lamba. 1;

WUXUU XEERAYAA

Qod. 1

Qodobka 1aad, Xeerka Nidaamka Xukuumadda Soomaaliya waxaa wax looga beddelay sida soo socota:

“Xukuumadda Soomaaliya waxa ay ku dhaqaqeysaa maamulka Gudaha, ee Dhulka, ayada oo u mareysa Guddoonka Golaha Wasiirrada iyo wasiirrada soo socda, sí waafaqsam mabaadi’da uu u dejinayo qodobka 1aad, ee sharciga 7 Maajo 1956, lamba. 1

- 1- Wasiirka Arrimaha Gudaha;
- 2- Wasiirka Maaliyadda (lacagta),
- 3- Wasiirka wershadaha iyo Ganacsiga;
- 4- Wasiirka Hawlaha Guud iyo Isgaarsiinta;
- 5- Wasiirka Beeraha iyo cilmiga Xoolaha;
- 6- Wasiirka Waxbarashada;
- 7- Wasiirka Caafimaadka, Xannaanada Xoolaha iyo Shaqada;
- 8- Wasiirka Arrimaha Guud”.

Qod. 2

Xeer Nidaamiyeyaal dambe ayaa lagu soo saarayaa wixii xiirar ah oo looga baahan yahay xagga qaab-dhismeedka Wasaaradaha iyo habsami u-shaqayntooda:

Qod. 3

Xeerka waxa uu u dhaqangelayaa sí degdeg ah.

Muqdisho, 24 Juunyo 1959.

Maamulaha

Mario Di Stefano

Wasiirka Kowaad

Cabdullahi Ciise Maxamuud

Waa arkay waana Diiwaangeliyey – Diiw. lamba. 16, xaashi lamba. 116.

Muqdisho, 25 Juunyo 1959.

Hati-dhowraha: **Spadaro**